

RUGTA CAAFIMAADKA GUUD

OGGOLAANSHAHA DARYEELKA CAAFIMAADKA

Carruurta iyo dhalinyarada, laga bilaabo dhalashada illaa ka qalinjabinta dugsiya sare, oo ku nool, ka shaqeeya ama dugsiya ka dhigtaan Dugsiya Dadweynaha ee St. Louis Park, ayaa u qalma inay ka helaan daryeel caafimaad oo bilaash ah Rugta Caafimaadka Guud. Si ay u helaan adeegyada caafimaadka ee hoos kuqoran, waa inaad buuxisaa foomkan ogolaanshaha oo aad ku soo celiso Rugta Caafimaadka Guud.

Waxaan bixinayaa ogolaanshaha in ilmahaygu isticmaalo adeegyada caafimaadka ee Rugta Caafimaadka Guud.

Magaca ilmaha: _____ **Taariikhda Dhalashada:** _____

Waxaan u ogolaanayaa ilmahayga inuu helo **DHAMMAAN*** Adeegyada rugta caafimaadka, oo ay ku jiraan kuwa soo socda:

- **Daryeelka joogtada ah:** Daaweynta cuduradda yar yar sida hargabka, ifilada, caabuqyada, madax-xanuunka, dhego xanuunka, dhuun xanuunka, murgacasho, sarmada, gubashada, dhibaatooyinka maqaarka, calool xanuunka iyo dhabar xanuunka; baaritaanada jirka ee cayaaraha; baaritaanada aragga iyo maqalka; iyo talaalada
- **Barashada caafimaadka:** Maareynta miisaanka, la-talinta cuntada gaarka ah, ka-hortaga sigaarka, iyo kor u qaadista badqabka
- **Adeegyada shaybaarka:** Baaritaanada joogtada ah ee dhiiga iyo kaadida, baaritaanka dhuunta, iyo baaritaanada sonkorowga
- **La-talinta:** Ka caawinta la tacaalida walaaca, walwalka, niyadjabka, xadgudubka iyo dayacaada, caafimaadka maskaxda, horumarinta isku kalsoonaanta, iyo kahortaga is-dilka

*** MUHIIM AH:** Haddii ay jiraan adeeyo kor ku qoran aadan rabin in ilmahaagu helo, fadlan iskutallaab saar. Isaga ama iyadu wuxuu/waxay heli doonaa/doontaa oo keliya adeegyada ku hara liiska. Fadlan ka war qab in Sharciga Minnesota u ogolahay ilmahaagu in laga daaweeyo, iyada oo aan lagaa haysan fasax ama ogolaansho, cudurada galmada lagu kala qaado, ku-tiirsanaanta kiimikada, iyo uurka iyo xaaladaha la xiriira uurka, oo ay ka mid tahay ka-hortagga uurka.

Xasaasiyadaha

Ilmahaygu wuxuu leeyahay xasaasiyadaha soo socda: _____

Dawooyinka

Ilmahaygu wuxuu qaataa dawooyinka soo socda: _____

Ma leedahay caymiska caafimaadka?

HAA _____ MAYA _____

Waxan kuu weydiineynaa macluumaadkan kaliya si ay ula socdaan barnaamijka Tallaalka Caruurta ee Minnesota. Booqashooyinka caafimaadka ee Rugta Caafimaadka Guud waa bilaash oo caymiskaaga laguma dallacayo.

Saxiixa: _____

(Waalidka ama Mas'uulka)

Taariikhda: _____

Xiriirka kaala dhaxeeyo ardayga: _____

Telefoon maalmeedka: _____

Foomkan oggolaanshaha wuxuu ku jiri doonaa faylka rugta caafimaadka wuxuuna ansax yahay hal sanad waxbarasheed. Oggolaansho qoraal ah ayaa loo baahan yahay sannad kasta.

Fadlan u soo celi foomka saxiixan _____